# NUXURKA GROENLINKS UTRECHT

**GroenLinks Utrecht** waxay rabtaa magaalo dadku wada-siman yahay oo nolosha bulshada iyo deegaanka isku miisaam tahayah.
Waxaan nahay xisbi deegaanka iyo xoolaha daneeyo, ku dadaalo sidii loo heli lahaa guryo qiimohoodu jaban yahay. Waxaan dagaal kula jirnaa sidii looga hortagi lahaa faqriga iyo kala sareynta, khaasatan xagga caafimaadka. Waxaan waqti badan galinnaa isbadalka tamarta. Waxaan culeyska saarnaa baraaraha iyo farxadda bulshada Utrecht, angoo ka hormarineyno koritaanka xagga dhaqaalaha, waxaana isha ku heynaa dhaqaale isku-xiran.
Waxaan qofwalba u siineynaa fursad uu ku hormaro, iyadoo loo marayo xagga waxbarashada, isdhex-galka bulshada (inburgering) iyo ka-qeybqaadashada bulshada.
Waxaan ahmiyad khaas siineynaa bulshada baaskiilka iyo lugta ku socoto. Waxaan bulshada ka difaacnaa dhibaateynteeda (criminaliteit) iyo in la xagliyo. Waxaan caado inoo ah sportiga, fanka iyo suugaanta. Waxaan shaqeynaynaa in hawada magaalada nadiif tahay, shanqarta iyo qashinka lala dagaalamo.
Howlahaan waxaan la waada-qabaneynaa bulshada Utrecht. Saas darteed dadka raba in ay wax qabtaan waan soo dhaweynaynaa, waana ku dhiirineynaa. Si hadafkeenna aan uga guulgaarno una helno magaalo bulsho isjecel waxaan si xirfadeysan u isticmaaleynaa dakhliga aan heysanno. Waxaan isku-taxalujineynaa in hantida la geliyo magaalada ay qeyb ka noqoto si magaalada dabeecadda deegaanka hagaagto (verduurzaming), kuwa qashinka sababa kharashka ugu badan bixiyaan, dadka dhaqaalaha badanna ay kharashka ugu badan bixiyaan.

**Waxaan ku dadaaleynaa in magaalada noqoto magaalo dadka iyo deegaanka u fiican,** si isbadalka cimilada aysan inoo waxyeelay oo loogu naaloodo in allaale iyo inta magaalada ku nooloonkarto. Waxaan abuureynaa dhir dheeraad ah, beero lagu nasto, Tiny Forest. Sidoo kale waxaan dhiseynaa waddooyin baaskiilka maraan iyo kuwo dadku ku lugeeyaan.

Waxaan rabnaa in dhirta ku soo badato Utrecht, afarsano ka dibna magaalada ka fiicnaato xaaladda hadda. Tan waxaan ku gaareynaa in biyaha iyo dhirta isku xirno, goobaha bulshada isug timaaddo cagaarino, loona olo-oleeyo xayawaanka.

GroenLinka waxay aaminsan tahay in xayawaanu ixtiraam mudan yihiin. **Waxaan rabnaa in aan ka hortagno waxyeeleynta xayawaanka intii kalaankeenna ah,** tusaale ahaan in dadka ka dhaadhicino in aysan gadan waxyaabaha laga sameeyo xayawaan la soo waxyeeleeyey.

GROENLINKS UTRECHT

**Waxaa inoogu muhiimsan sidii loo heli lahaa guryo qiimohoodu jaban yihiin.**
Si guryo la'aanta baaxadda ley loo xalliyo, waxaan bixin doonaa goobo-cusub oo dhismo guryo laga fuliyo, guryo ku meelgaar ah. Intaa waxaa dheer in iyadana la dhisi doono guryo: 60.000 marka lagaaro sanadka 2040.

Waxaan dib-u-dhis ku sameyn doonaa xafiisyada ee safan, inagoo ka dhigi doono goobo deegaan, sida A12 zone, Papendorp, Rijnsweerd iyo Merwedekanaalzone. Waxaan ka faa'iideysan doonnaa dhulka si loogu guuleysto in qofkata deegaan helo. Waxaan boorineynaa in dukaannada dushooda ay noqdaan hoy la dago.
Inta aan ku jirno xalinta guryo la'aanta waxaan ku dadaaleynaa in xaafaduhu noqdaan meel lawada-dagan yahay, 40% guryo sociaal ah. Guri walba waxaa uu noqonaayaa mid u fiican cimilada iyo deegaanka, una fudud in qofkasta (cuuryaanka) dagi karo.

**Waxaan culeyska saareynaa in aan soo afjarno dadka sii badanaya ee faqriga wehel u noqday** ee Utrecht. Waxaan kordhineynaa waxyaabaha dheeraadka ah ee lagu saacidayo dadka dhaqaalohoodu liito. Waxaan sii wadeynaa xallinta dakda deemeysan, oo khash dheeraad ah ayaan soo fasaxeynaa.

**Waxaan culeyska saareynaa sidii loogu guuleysan lahaa in isbadalka tamarta**, oo aan iska xilsaarno sidii uu qofwalba u heli lahaa, qiimana jaban. Waxaan marka hore sameynaynaa in guryaha si fiican loo dhiso oo aysan dabeysha iyo dhaxanta soo gudbin. Intaa waxaa dheer in aan ballaarino tamarta dabiiciga ah, mashruucyo kuwo yaryar iyo waaweynba, iyadoo dadka deegaanka dagan laga qeyb galinaayo. Waxaana loogu horeysiinayaa dadka xaafadaha dagan ee raba in ay gaaska isticmaalkiisa joojiyaan.

**Waxaan aaminsan nahay caafimaad qofwalba iska dhex arki karo,** guriga ka ag-dhow oo ku saleysan kalsooni. Waxaan culeyska saaraynaa ka hortagga si daaweyn looga hortago, waxaana ka shaqeynaynaa in bulshada ay isku si u caafimaad qabaan. Markii daaweyn loo baahdo, waa in ay dhaqso u helaa qof kasta. Sidaas ayaanna uga hortageynaa in dhibka caafimaad sii weynaado. Waxaan il-gaar ah ku haynaynaa arrimaha tarbiyada caruurta.

GroenLinks waxay koboca dhaqaalaha ka doorbideysaa rayn-raynta iyo farxadda dadka deegaanka daggan. Waxaan ka shaqeynaynaa horumarka ballaaran, iyadoo marwalba la ilaalinayo deegaanka iyo dabeecadda. **Waxaan rabnaa in aan u gudubno dhaqaale iskaaba (bini-aadam iyo duunyaba)** kaasoo ku shaqeynaya waxyaabaha u fiican ilaalinta deegaanka iyo dabeecadda. Waxaan saacideynaa wada-dhaqanka bulshada iyo ganacsiga deegaanka. Shirkadaha wax soosaarana ku dhiirineynaa in wax tijaabiyaan oo ay wada shaqeeyaan.

Waxaan dadka ka dhaadhicineynaa ilaalinta danta deeganka iyo dabeecadda, guud ahaan bulshada Utrecht ku nool.

Qofwalba oo Utrecht daggan waxaa uu xaq u leeyahay warbarasho aanan kala soo lahayn. **Waxaan rabnaa in qofkasta oo horumar sameyn karo,** wax la barto, xirfad layeesho ama calaaqaad lala sameeyo bulshada kala duwan. Waxaan rabnaa in fursad isku mid ah u abuurno caruurta iyo dhalinyarada. Waxaan si taxadar ku jiro isha ugu heynaynaa dadka aan wax akhrin karin, ama qori karin ama aanan aqoon sida loo isticmaalo aaladaha qoraalka lagu sameeyo. Dadka deegaanka daggan ee aanan shaqeyn ama haysta shaqo aanan la isku hubin waxaan siineynaa fursad ay wax ku bartaan.

**Waxaan aaminsan nahay ilaalinta xuquuqda qaxootiga taas oo ku dhisan bini-aadinimo**. Magaalada Utrecht qaxootiga ku nool waa in si buusda ula noolaadaan bulsho weynta Utrecht. Waxaan waqti galineyaa guryeyntooda, waxbarashadooda, koorsooyinka is-dhexgalka bulshada iyo waxlaqeybsiga bulshada. Waxaan diyaarineynaa meelihii ay ku noolaan lahaayeen, xittaa haddii qofku sharci uusan lahay. Waxaan dagaal la galeynaa in lagu shaqeysto si xad-gudub ku jiro, ama wixii bini-aadinimada ka baxsan. .

GroenLinks waxay dooranaysaa magaalo lagu noolaan karo, halkaas oo qofku oo dhex mari karo da' kasta, dhaqaale kasta ama awoodkasta ha lahaadee. **Baaskiillada iyo dadka lugeynaya ayaa ahmiyadda koowaad la siinayaa,** meelo badan baabuurta waa laga xannibayaa. Waxyaabahaan waxay inaga saacidi doonaan in hawadu hawo nadiif ah noqoto, nabadgalyada way u fiican tahay.

**Qofwalba wax uu xaq u leeyahay xorriyaddiisa iyo nabadgalyadiisa**. Kama indho qarsaneynayno in aan la dagaallano kuwa sharciga ku xad-gudbayo ee Utrecht ka dhaca, tallaabada laga qaadana waa in ay bilow u noqotaa sidii xalwaaara loo heli lahaa. Sida ugu fiican ee Utrecht u noqon karto goob nabdoon waa in laga hortagaa ku xad-gudubka sharciga.

Dowladda hoose waxay juhdi galineysaa sidii bulshada xiriir u sameyn lahaayeen, iyo xaafadohoodaba. **Waxaan la dagaalameynaa cunsiriyenta, jinsiyadda (rag/dumar) shaqsiyaddooa wax laga sheego, wax-la-jajabiyo iyo qolo la faquuqo**.

Dowlad sharci ku dhisan waa in bulshadeeda ka ilaalisaa in ay ku xadgudubto. Sidaa darteed waxaan aad u dhowri doonaa sirta iyo waxyaabaha khaaska u ah shaqsidga. Waxaan dhaleeceynayaa lana dagaalameynaa in hay'adaha dowliga ah ay kala soocdo bulshada ama ajaanibta si khaas ah loo target-gareeyo.

**Isboortiga ahmiyad ayaan siineynaa**, waa hadaf iyo aalad aan u siticmaaleyno kobcinta caafimaadka iyo bulshada Utrecht in nolosha magaalada kaga qeyb qaadato. Iyadoo ka qeyb qaadashada isboortiga ee curuurta iyo bulshada dhaqaalohoodu liito ayaan waxaan

ka hortageynaa in bulshada u kala jabto kuwo wax heysta oo isboortiga iska bixin kara iyo kuwo aanan wax heysan oo sidaa uga hara in ay isboortiga ka qeyb qaataan. Waxaan saacidaad dheeraad ha siineynaa hay'adaha isboortiga ee yaryar.

**Waxaan u dooneynaa sidii dib-u-qiiemeyn loogu sameyn lahaa hiddaha iyo dhaqanka.** Daneynta qalbiga ah ayaa ahmiyadda koowaad leh. Caabuqa Korona dhibaato badan ayaa laga dhaxlay, khaasatan hay'adaha hiddaha iyo dhaqanka ee Utrecht. Waxaan ku dadaaleynaa sidii ay u soo kabsan lahaayeen, iyadoo kharash lagalinaayo. Markaan magaalada qorshe mustaqbal u sameynayno, sida dib u dhiska degmooyinka magaalada, waxaan ugu horeyntiiba ahmiyad gaar ah siineynaa arrimaha hiddaha iyo dhaqanka iyo fakarada cusub.

**Hawada Utrecht waa in fiicnaataa.** Waxaa ku jira caafimaadka qofwalba, iyadoo si khaas ah loo eegayo dadka caafimaadkoodu liito. Saas darteed Groenlinks waxay sanaddadii ugu dambeeye culeyska saartay deegaanka iyo dabeecadda Utrecht. Waan sii ballaarineynaa, magaaladana baabuurta waa laga yareyn, si markaa ugu dambeyn 2030 aan ugu guuleysanno tayada hawada maagaalada laga rabo ee ay xaddiday hay'adda caafimaadka ee adduunka.
**Waxaan gacanta adag ku qabaneynaa sawaxanka**, taas oo ah waxyaabaha caafimaadka waxyeeleeyo marka laga soo tago dhibaatooyinka qashinka deegaanka iyo dabeecadda waxyeeleeyo. Waxaan ahmiyad siineynaa sidii wax looga qaban lahaa sawaxanka deegaanka la daggan yahay, khaasatan halka ay ku badan yihiin bulshada aanan dhaqaalohoodu badneyn.

Dowladda hoose waxay u baahan tahay kalsoonida iyo aqoonta bulshadeeda si ay shaqo fiican u qabato. Groenlinks waxay rabtaa in dowladda hoose ay bulshadeeda kala hadasho mar alaale iyo markii ay siyaasad cusub dajineyso. Waxaan rabnaa in dowladda hoose ay kalsooni kastabo, taana waxaa lagu gaari karaa markii ay bulshadeeda dhageysato, ayna run ka sheegto illaa iyo xadka ay haysato oo wax looga badali karo qorshayaasha la dajiyey.
**Ka qeyb-galka bulshada waan ka run sheegeynaa, waxaanna raadineynaa ra'yiga yo fakarada bulshada aanan sida sahlan warkooda loo maqlin**. .Si aan tan u gaarno waxaan xoojineynaa xiriirada jira ee Utrecht.
GroenLinks waxay fursad siineysaa is-xilqaannada qeyb ka noqonaya xal u helista dhibaatooyinka magaalada. Dowladda hoose waxay soo dhaweynsaa fakarada eedeynta ku dhisan, bulshada wanaaggeeda iyo adeeggeeda ka duulaya.

GroenLinks waxay Utrecht u haysaa dadaal-badan: magaalo bulsho oo deegaan wanaagsan u leh dadkeeda oo dhan. Si tan loogu guuleysto, waxaan si firfircooni iyo beeqaamin ku jirto u isticmaaleynaa dhaqaalaha la haysto. Intaa waxaa dheer in

maalgalintaan ay dhaxal fiican u yeelato dabeecadda deegaanka, in kharashka ugu badan laga qaado kuwa hawada/deegaanka wasaqeeyo, sidoo kalena in kharashaadka laga qaado inta badan qofba qofka uu ka dhaqaale badan yahay.

Caabuqa koronada waxaa uu sababay in 2020 iyo 2021 dhaqaale badan oo aan lagu talo galin naga boxo. Groenlinks waxauy dooranaysaa in khatarta jirta aanan la sii weyneynin oo aan dhaqaalaha la jarin. Ma ogolaaneyno in caabuqa Korona dartiis dhaqaalihiisa gabi-ahaanba lumiyo. **Waxaan maalgalineynaa mustaqbalka.**

GROENLINKS UTRECHT